



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagaxisada (GQKL/LMA)
National Anti-money laundering And Counter Terrorism Financing Committee (NAMLC)

SUM: GQKL/LMA/001/24

TR: 13/04/2024

Liiska Cunaqabateynta Maaliyadeed

Guddiga Qaran Ee Ka-hortaga Lacag Dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagaxisada (GQKL/LMA) National Anti-money laundering And Counter Terrorism Financing Committee (NAMLC) wuxuu si waafaqsan qodobka 6aad ee Sharciga cunaqabateynta maaliyadeed ee cayiman 2023 soo saaray liiska qaran ee astaynta shaqsiyaadka looga shakiyey maalgelinta argagaxida Alshabaab.

Magacyada shakhsiyaadka

1. Cabdulaahi Tahliil Xiireey
2. Xasan Cali Afgooye
3. Cabdikariin Axmed Jugajuge
4. Faysal Cabdulaahi Yuusuf
5. Nuux Ciise Lugoole
6. Sayid Cali Shirwac
7. Cabdulaahi Cismaan Maxamed (Tuutax)
8. Cabdulaahi Xasan Cabdi Cosoble (Wadaad)
9. Maxamed Sahal iidle

Sidaa darteed, dhammaan hay'addaha warbixinada ee ku xusan qodobka 4aad¹ ee sharciga ka-hortaga lacag dhaqidda & la-dagalaanka maalgelinta argagaxsida, muwaadiniinta Soomaaliyeed & shaqsiyaadka ama hay'addaha kale ee jooga gudda Soomaaliya:-

- 1) Waxaa ka reeban in ay la macaamilaan shaqsiyaadka ku jira liiskan
- 2) Waxaa waajib ku ah in ay xayiraan hanti kasta ay leeyihiin shaqsiyaadka ku xusan liiskan;
- 3) Waxaa sidoo kale waajib ku ah in warbixin deg deg ah ku saabsan dhaqdhaqaaqyada (transactions) shaqsiyaadkan u diraan xarunta warbixinada maaliyadda Financial Reporting Center (FRC).

¹Hay'addaha maaliyadeed; Qareennada, nootaayooyinka, xirfadlayaasha kale ee sharciga ee madax-bannaan, xisaabiyeyaasha & shirkadaha ka ganacsada hantida maguurtada ah.

Xaqa Shaqsiyaadka Guddiga Qaran Asteeyey

Qofka ku xusan liiskan ee dareemaya in si khaldan loo asteeyey, waxaa si waafaqsan qodobka 8aad ee sharciga cunanqabateynta maaliyadeed ee cayiman u furan, in uu u dacwodo guddiga qaran, si loo qiimeeyo astayntiisa wax ka badalna loogu sameeyo hadii loo arko munaasib.

Waxa waajib ah inuu soo gudbiyo cadaymo maangal ah, sugaya in uusan ku lug lahayn maalgelinta argagaxisad.

Hadii uu ku qanci waayo jawaabaha guddiga qaran ee astaynta, waxaa dhibanaha u furan in uu u dacwodo maxkamada sare ee dalka si waafaqsan qodobka 9aad ee sharciga cunanqabateynta maaliyadeed ee cayiman ee 2023.

Liiska Horjoogeyaasha

Macluumaadka Horjoogaha 1-aad		
Magaca Rasmiga	Cabdulaahi Tahliil Xiireey	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Cabdulaahi Jeeri	
Magaca Hooyada		
Ku dhashay	Ceel Lahelay, Galguduud	
Da'da	50-52	
Qabiilka	Duduble, Hawiye	
Astaamaha guud	Maariin madoow xigeen ah gaaban waji dhuuban san dhuuban, dadka da'ada qarsada ee barta yar, waji dhuuban, afyar, lugta ka dhutiya oo ciribta kor u qaadan tahay wax yar.	
Taleefan Lambar		
Xilka	Madaxa soo iibinta Hubka, Rasaasta, iyo Gaadiidka	
Deegaanka uu joogo	Jilib, Jubbada Dhexe	
Waxbarashada	Darawal iyo biryaqaan, wax barasho gaar ah oo aan ka ahayn tababarada Shabaab malaha	
Faahfaahin	Cabdulaahi Jeeri waxuu kamid yahay dadka ugu halista badan ee shabaab waana ninka usoo iibiya dhamaan hubka iyo rasaasta waxayna toos isugu xiranyihiin madaxda maaliyada AS, oo uu ka qaadaa lacagta uu doono xilikasta, una kala diraa Meesha uu kasoo iibsanayo hubka iyo rasaasta	

Macluumaadka Horjoogaha 2-aad		
Magaca	Xasan Cali Afgooye	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Xasan Afgooye	
Magaca Hooyada		
Ku dhashay	Afgooye, Shabeellaha Hoose	
Da'da	55-60	
Qabiilka	Jareer	
Astamaha guud	Maariin midab furan, itaal dheer, hilib dhex dhexaad ah leh, garyar leh oo inta hore ah, gar adag.	
Taleefan Lambar		
Xilka	Hanti Dhowraha Guud ee Al Shabaab	
Deegaanka uu joogo	Kuunyo Barow, Jubbada Dhexe	
Heerka Waxbarashada	Dugsi Sare iyo macaahida shareecada	
Faahfaahin	Waa ninka lacagaha gaarka u haya Horjooge Axmed Diiriye, oga meelaha lacagaha shabaab la galiyo kayd iyo maalgashiba	

Macluumaadka Horjoogaha 3-aad		
Magaca Rasmiha	Cabdikariin Axmed Jugajuge	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Jugajuge	
Magaca Hooyada		
Ku dhashay	Doon Dheere, Hiiraan	
Da'da	39 - 42	
Qabiilka	Murusade, Hawiye	
Astamaha guud		
Taleefan Lambar		
Xilka	Madax Maaliyada Gobolka Benaadir ee Al Shabaab	
Deegaanka uu joogo		
Heerka Waxbarashada	Dugsi Sare	
Faahfaahin	Jugajuge waxa uu kamid yahay ragga ugu sareeya Maaliyadda gobalka Benaadir waxa uu xiriir weyn la leeyahay Cabdulaahi Cusmaan Maxamed (Tuutax) oo haya Maaliyadda Mutafajiraadka iyo Cabdulaahi Tahliil Xiireey (Jeeri) oo haya libka Guud ee hubka iyo Rasaasta ee Al Shabaab. Tuutax iyo Jeeri labaduba waa qaraabo.	

Macluumaadka Horjoogaha 4-aad		
Magaca Rasmiga	Faysal Cabdulaahi Yuusuf	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Cabdikariin Horseed / Feysal Gaagaale	
Magaca Hooyada	Ruqiyo Macalin Cabdulle	
Ku dhashay	Galhareeri, Galgauduud	
Da'da	35	
Qabiilka	Foolculus, Murusade, Hawiye	
Xaaska	Qureesh Yaxye Cali	
Astamaha guud	Waji dhuuban, maariin ah, itaal dhex dhexaad ah, san dhuuban, madax wayn	
Taleefan Lambar		
Xilka	Ku xigeenka Amiirka guud ee Maaliyada Al Shabaab	
Deegaanka uu joogo	Saakow, Bulafuulay iyo Jilib ayuu u dhaxeeyaa	
Heerka Waxbarashada	Dugsi Sare - Axmed Gurey Muqdisho	
Faahfaahin	Cabdikariin Horseed waa qofka shaqada rasmiga ah ee maaliyada Al Shabaab gacanta ku haya, halka uu report kaliya ka siiyo Maxamed Sahal. Waxaana la dhihi karaa isaga ayaa ah madaxa maaliyada Al Shabaab.	

Macluumaadka Horjoogaha 5-aad		
Magaca Rasmiga	Nuux Ciise Lugoole	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Nuux	
Magaca Hooyada	Faadumo Cilmi Cabduqaadir	
Ku dhashay	Xiindheere	
Da'da	38 - 41	
Qabiilka	Duduble, Hawiye	
Astamaha guud	Nin laf leh 1.75 dhiririkiisa yahay qiyaastii oo dhiig furan, labis badan, tintiisa xogaa adagtahay	
Taleefan Lambar		
Xilka	Xisaabiyaha Guud ee Al Shabaab	
Deegaanka uu joogo	Jilib iyo Saakow	
Heerka Waxbarashada	Dugsi Sare	
Faahfaahin	2016 - 2024 waxa uu ku kamid ahaa ragga sare ee maaliyadda sidoo kale xisaabiyaha Guud ee kooxda. Waxa ay qaraabo dhow yihiin Amiirkii hore ee Wilaayaadka xiligaas Daahir Gacamey, wakhtigaas ayuu sameeyey lacag badan. Sidoo kale wuxuu soo maray Amiirka Qaniimada waana halka uu kasoo bilaabay shaqadiisa Maaliyadda.	

Macluumaadka Horjoogaha 6-aad		
Magaca Rasmiga	Sayid Cali Shirwac	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Shirwac	
Magaca Hooyada		
Ku dhashay	Godinlable, Galgaduud	
Da'da	45 - 47	
Qabiilka	Saleebaan, Habar Gidiir, Hawiye	
Astamaha guud	Gaaban, aad u madoow, laf yar laakiin hilib yar leh, waa nin san gaaban	
Taleefan Lambar		
Xilka	Qasnajiga Guud ee Al Shabaab	
Deegaanka uu joogo	Jilib, Jubbada Dhexe	
Heerka Waxbarashada	Heer Jamacadeed	
Faahfaahin	Waa nin fir fircoon oo aad loogu kalsoon yahay, gaarsiiyana lacagaha meelkasta oo ay uga baahan yihiin kooxda.	

Macluumaadka Horjoogaha 7-aad		
Magaca Rasmiga	Cabdulaahi Cismaan Maxamed Tuutax	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Tuutax	
Kudhashay	Galguduud	
Magaca Hooyada		
Da'da	37 - 39	
Qabiilka	Duduble, Hawiye	
Astamaha guud	Gaaban, madoow, buuran, qaarka hore u wayn, madaxwayn, waji balaaran, gar muuqda malaha.	
Taleefan Lambar		
Xilka	Madaxa Maaliyada Farsamada Qaraxyada	
Deegaanka uu joogo	Jilib iyo Buaale	
Heerka Waxbarashada		
Faahfaahin	Tuutax waa ragga ugu muhiimsan kooxda maaliyadooda, waana ninka agabka oo dhan u soo gada adeegsadana lacagta ugu badan. Wuxuu hayaa lacagaha farsamada qaraxyada, waxay saaxiib dhaw iyo shaqo wadaag yihiin Eng. Ismaaciil Dhagacade	

Macluumaadka Horjoogaha 8-aad		
Magaca Rasmiga	Cabdulaahi Xasan Cabdi Cosoble	Sawirka
Magaca loo yaqaan	Cabdulaahi Wadaad	
Magaca Hooyada	Xakiima Axmed Tifow	
Ku dhashay	Ruun Nirgood, Shabeelaha Dhexe	
Da'da	50 - 55	
Qabiilka	Daaud, Abgaal, Hawiye	
Astamaha guud	Midab cad, indhihiisa waxaa loo maleynayaa in uu weershe yahay, itaal dhex dhexaad ah leh, mana buurno caato saaid ahna ma aha	
Taleefan Lambar		
Xilka	Isku xiraha Maaliyada iyo Sakawaadka Gobalka Benaadir iyo Sh/Dhexe	
Deegaanka uu joogo	Jilib iyo Kuunya Barow	
Heerka Waxbarashada		
Faahfaahin	Madixii hore ee Maaliyadda iyo Zakawaatka Gobolka Sh/Dhexe 2012 -2020. 2020 - 2024 wuxuu noqday Madaxa Zakawaatka Gobolka Benaadir ahna isku xiraha Maaliyadda Iyo Zakawaatka Sh Dhexe iyo Benaadir.	

Macluumaadka Horjoogaha 9-aad		
Magaca Rasmiga	Maxamed Sahal iidle	Sawirka
Magaca loo yaqaan	lidle	
Magaca Hooyada		
Da'da	53 - 55	
Qabiilka	Maxamed Subeer, Ogaadeen, Daarood	
Astamaha guud	Xoog leh, midab madoow, garwayn oo joog dhex dhexaad ah leh.	
Taleefan Numberada		
Xilka	Amiirka Maaliyada Al Shabaab	
Deegaanka uu joogo	Jilib iyo Buaale	
Heerka Waxbarashada	Bartay Dhaqaalaha, Heer Jamacadeed	
Faahfaahin	<ul style="list-style-type: none"> ▪ 2006 ayuu ku soo biiray kooxda ▪ 2009 waxaa loo magacaabay Madaxa Maaliyada ee Gobolada Jubooyinka ▪ 2011 waxaa loo magacaabay madaxa dabagalka Maaliyada ▪ 2019 waxaa loo magacaabay Waaliga Shabeellaha Hoose ▪ 2022 waxaa loo magacaabay Amiirka Maaliyada kooxda, xilkaas oo uu ila hadda hayo ▪ Waxey saaxiib dhaw yihiin ganacsina ka dhexeeyaa AXmed Diiriye, waana nin uu ku kalsoonyahay Reer Kismaayona isla ahaayeen. 	

Wabillaahi towfiiq

Kala soo xiriir

Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada (GQKL/LMA)

E-mail: info@namlc.gov.so